

Waxa la Filan Karo Maalinta Doorashada

Goorma ayaan codeyn karaa Maalinta Doorashada?

- ★ Waxaad ka codeyneysaa goobta codbixinta ee degmadaada ama magaaladaada. Goobtani waxaa go'aamiya ciwaanka goobtaada.
- ★ Inta badan goobaha codbixinta ee Maine waxay furan yihiin laga bilaabo 7am ilaa 8pm. Waqtiyadu waa ay kala duwan yihiin magaaloooyinka waxayna ku xiran tahay tirada dadka ku nool magaaladaada.
- ★ Wac xafiiska magaaladaada si aad u ogaatid saacadaha iyo meesha ay ku taasho goobtaada codbixinta.

Miyaan u baahanahay inaan wax soo qaato marka aan codeynta u baxayo?

- ★ Haddii lagu diiwaangeliyey inaad codeyso Maalinta Doorashada, uma baahnid inaad wax u soo qaadato goobta codbixinta.
- ★ Haddii aan lagu diiwaangelin inaad codeyso Maalinta doorashada, waa in aad la timaadaa qaab Aqoonsi iyo dukumiinti muujinaya ciwaanka meesha aad dagan tahay.
 - ① Haddii aad soo hilmaanto dukumiintiyadaada xaqiijinta aqoonsigaaga, waxaad dhiiban kartaa **codbixin kumeelgaar ah**.
 - ① Waxaa laga yaabaa in lagu weyddiyo inaad tusto Aqoonsigaaga doorashada kadib si loo xaqiijiyo in codkaaga la xisaabiyo.
 - ① Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo webseedka Xoghayaha Gobolka ama iskaangaree koodhka QR ee hoose.



Sidee ayaan u calaamadeeyaa warqadeyda codbixinta?

- ★ Warqad kasta oo codbixin waxay kuu sharrixi doontaa sida loo calaamadeeyo dookhyadaada.
- ★ Haddii aad qabto su'aalo, waxaad caawimaad weydiisan kartaa sarkaal qaabilsan doorashada.
- ★ Haddii aad khalad sameyso, waxaad isku-laabi kartaa warqaddaada codbixinta, u dhiibi kartaa sarkaal qaabilsan doorashada oona weydiisan kartaa warqad cusub. Warqadaas lama tirin doono. Waxaa lagu ridi doonaa sanduuq gaar ah waxaana lagu qori doonaa “warqad hallowday.”

Qofka mas'uulka iga ah ma inuu ila yimaadaa goobta codbixinta?

- ★ Sida uu dhigayo Xeerka Caawinta Codbixinta Mareykanka, waxaad xaq u leedahay inaad si keligaa ah u codeyso. Qofka mas'uulka kaa ah uma baahna inuu kula yimaado marka aad codeyneyso.
- ★ Haddii lagu sheego in aadan keligaa codeyn karin, qeybta Xuquuqda Naafada Maine kala xiriir 800.452.1948. Waxaad sidoo kale Xafiiska Qeybta Doorashada ee Xoghayaha Gobolka kala xiriiri kartaa 207.624.7650.

Ma u soo wadan karaa xayawaanka i caawiya goobta codbixinta?

- ★ Sida uu dhigayo xeerka ADA, shakhsiyaadka naafada ah waxay u soo wadan karaan xayawaankooda caawiya goobta codbixinta.
 - ⇒ Xayawaanka caawinta waxaa lagu qeexaa eey si gaar ah loogu tababaray inuu qabto hawlo si toos ah ula xiriira naafada uu qabo qofka.



Wax su'aalo ah? Booqo: <https://drme.org/voting>

limayl u dir: advocate@drme.org

Wac: 207.626.2774 (V/TTY); 800.452.1948 (V/TTY);
207.766.7111 (VP)